# Guurida ka dib kala maqnaanshaha ama furiinka?

Sharciyada daryeelka walaidka *Xeerka Furiinka,* ee ahaan jiran “haynta” iyo “helida,” way isbeddeleen. Si kastaba ha ahaatee, isbeddelan **kuma habboona** ilaa Maarso 1, 2021. Ilaa markaan, sharciga hadda ayaa ku habboon.

Boggan waxa uu leeyahay macluumaadka ku saabsan sharciyada cusub ee ku habboon guuritaanka ka dib Maarso 1, 2021.

*Xeerka furiinka* ee cusub waxaa ka mid ah haylka lagu hagayo walaidka is furay ama is furaya, xirfad yaqaanka cadaalada qoyska iyo maxkamadda xaaladaha marka waalidku qorsheeyaan

- in lala guuro ilmahooda **ama**
- in laga guuro ilmahooda

Waxaa jira sharciyo ku saabsan:

- tallaabooyinka wanaagsan ee la raacayo marka waalidku ay qorsheeyaan inay guuraan
- sida maxkamaddu ay go’aan uga gaadhayso haddii ilmahu uu karo inuu meel kale u guuro.

Sharciyada waxaa loogu talo galau in laga caawiyo waalidku inay ku heshiiyaan waxa ku saabsan meel kale uguurida oo ay iska ilaaliyaan maxkamadda halka ay suuragal tahay.

## Boggana

**Waa maxay “meel kala u guurida”?**
**Marka aad u baahan tahay inaad bixiso ogaysiiska qorshaha in la guuro**
**Kumaad u baahan tahay inaad ogaysiis siiso**
**Waxa uu yahay ogaysiiska aad u baahan tahay inaad sheegto**
**Filashooyinka in la ogaado haddii aad ka baqanayso wax ku saabsan badbaadaada ama badbaadada ilmahaaga**
**Waxa dhacaya ka dib ogaysiiska meel kale u guurid amarka la bixiyo**
**Sida maxkamaddu ay go’aan uga gaadhayso haddii ilmahu uu karo inuu meel kale u guuro**
**Kharashyada safarka si loogu dhaqmo wakhtiga daryeelka walaidka**

Xusuuso: ka dib Maarso 1, 2021, shruudaha "ilaalinta" iyo "helida: in dheeraad ah lama isticmaali doono *Xeerka Furiinka*. Marka xaashida xaqiiqda (bogga internatka tixraacaya amarada maxkamadda ee "masuuliyada daryeelka waalidka," waxaa ka mid ah labbadaba amarada hore ee "ilaalinta" iyo "helida" siiba amamrada cusub ee daryeelka walaidka kaas oo qoondeeya "wakhtiga

## Waa maxay "meel kala u guurida"?

Dhammaan guuritaananda loogama fekero "meel kale u guurid." *Xeerka Furiinka* waxa uu leeyahay sharciyo kala duwan oo ku xidhan haddii guurida qofka leh masuuliyadaha daryeelka waalidka ama ilmahu ay u saamayn doonaa xidhiidhada ilmaha qaab wax ku ool ah.

"**Meel kale u guurida**" guud ahaan macnaheedu waxa weeye jadwalka wakhtiga daryeelka waalid ee ilmaha in dheeraad ah ma shaqeeyo sababtoo ah guurida. Tusaale ahaan, waalidka waxay kala guuraan ilmahooda Newfoundland ilaa Ontario waxaa guud ahaan looga fekeraa meel kale u guurid inay tahay. Waalidka kala guura Newfoundland ilaa Ontario iyagoo wata imahooda sidoo kale waxa ay noqonayaan meel kale u guurid. Tani waa sababtoo ah fogaanta u dhaxaysa guriga cusub iyo guriga hadda ee ilmaha, iyo sida ay tanu u saamaysao jadwalka wakhtiga daryeelka waalid.

Waa muhiim in la eego xaalad kasta iyo saamaynta ilmaha. Wakhtiyada qaarkood xataa guurida fogaanta dhow waxay noqon kartaa "meel kale u guurid" haddi ay jiri doonaan saamayn wax ku ool ah oo jadwalka daryeelka waalidka ah.

## Marka aad u baahan tahay inaad bixiso ogaysiiska qorshaha in la guuro

Haddii aad haysato amarka maxkamadda oo waafaqsan Xeerka Furiinka ee masuuliyadaha waalidka, waa inaad ogaysiis siisaa qorshahaaga in la guuro.

Waxaadu baahan tahay inaad ogaysiis siiso haddii aad qorshaynayso inaad ilmahaaga la guurto ama addoon ilmahaaga wadab.

## Kumaad u baahan tahay inaad ogaysiis siiso

Waxaad u baahan tahay inaad ogaysiis siiso qorshahaaga inaad la guurto:

- qof leh masuuliyada daryeelka waalidka
- qof leh amarka xidhiidhak ee waafaqsan amarka xidhiidhka

Macluumaadka dheeraadka ah ee ku saabsan daryeelka waalidka iyo amarada maxkmadda [Qaban qaabda daryeelka waalidka ka dib kala magnaanshaha ama furitaanka](#) xaashida xaqiiqda.

## Waxa uu yahay ogaysiiska aad u baahan tahay inaad sheegto

### Guurida aan hayn meel kale u guurid

Haddii guuridu aanay ku lhaan dooni saamayn wayn ilmaha xidhiidhka uu la leeyay dadka ka helaya ogaysiiska -- tusaale ahaan, badanka guurida gudaha magaacalaadada -- waa inaad qofka kale ogaysiisaa.

- taariikhda aad guurayso
- cinwaankaaga cusub
- macluumaadkaga cusub ee xidhiidhka

Tani waa sidaas dadka kale ee leh masuuliyadaha daryeelka walaidka ama amarka xidhidhku waxay garan doonaa halka ilmahu ku nool yahay, iyo halka laga soo qaado ama la keeno ilmaha.

**Xusuuso: haddii guuridu ay dhici karto inay saamayn wayn ku lahaado jadwalka wakhtiga daryeelka waalidka, tani waa meel kale u guurid, markaas waa inaad raacdaa sharciyada ogaysiiska ee meel kale u guurida.**

### Guurida ah meel kala u guurida

Haddi guuridu ay ku lahaanayso saamayn wayn xidhiidhka ilmahu la leeyahay dadka helaya ogaysiiska - tusaale ahaan, jadwalka wakhtiga daryeelka waalidka in dheeraad ah ma shaqaynayo - markaa waa “meel kale u guurid” oo wa ainaad raacdaa sharciyada meel kale u guurida ee waafaqsan *Xeerka Furiinka.*

Haddii aad qorshaynayso inaad meel kale u guurto, wa ainaad:

- ogaysiis bixisaa ugu yaraan 60 maalmood guurida
- aad bixisaa faahfaahinta gaarka ah ee ku saabsan guurida. Foomka **Ogaysiiska Meel kale u Guurida** kuu muujiya adiga dhammaan macluumaadka aad ku darayso ogaysiiskaaga. Foomkan waxa uu ku waydiisaa macluumaadka ku saabsan:
    - marka guurida ay dhacayso
    - cinwaankaaga cusub
    - macluumaadkaaga xidhiidhka
    - sida aa du malaynayso daryeelka waalidka iyo jadwalka xidhiidhka waa la beddeli karaa si loo caawiyo xidhiidhada ilmahhaagau la leeyahay dadka helaya ogaysiiska, haddii meel kale u guuridu dhacdo

**Xusuuso: xataa halka waalidku uu u guurayo iyagoon wadan ilmahooda, ogaysiiska meel kale u guurida weli waa loo baahan yahay. Tani waa sababtoo ah guurida waxay ku yeelayanaa saamayn wayn xidhiidhka ilmahu uu la leeyahay waalidkaas.**

## Filashooyinka in la ogaado haddii aad ka baqanayso wax ku saabsan badbaadaadaada ama badbaadada ilmahaaga

Haddii aadka baqanayso wax ku saabsan badbaadadaada ama badbaada ilmaha, waxaad waydiin kartaa maxkamadda isbeddelka sharciyada ogaysiiska. Waxaad ka codsan kartaa maxkmadda addoon u sheegin kooxada kale (caadi ahaan waalidka kale).

*Xeerka Furiinka* waxa uu bixiyaa tusaalaha rabshada qoyska sida xaalada halka isbeddelka sharciyada ogaysiiska la oggolaan karo. Maxkamaddu waxay u baahan doontaa caddaynta rabshada qoyska (tusaale ahaan, wicitaanada 911, warbixinaha booliska, sawirada) si loo taageero codsigaaga ka reebida sharciyada ogaysiiska.

## Waxa dhacaya ka dib Ogaysiiska Meel kale u Guurida marka la bixiyo

### Sii wad isku dayga inaad heshiish gaadho

*Xeerka Furiinka* waxauu ka filayaa waalidku inay isku dayaan arrimaha shaqo ee la xidhiidha carururta ee ay ku jirto meel kale u guurida suuragalka ah ee ilmaha, iyaddoo la isticmaalayo xalka maxkamadda ka baxsan ee khilaafka qoyska nidaamyada sida wada hadalka iyo dhexdhexaadinta, iyaddoo aanay wax habboon noqonayn mooyaane. Guud ahaan way u wanaagsan tahay waalidka inay la soo baxaan xalka, maadaam aad si wanaagsan u taqaano caruurtaada. Garsooraha sidoo kale waxa uu go’aan ka gaadhi karaa in hal ama labbadiinabu aynaad jeclayn.

Waxaa jira asbaabo badan oo looga fekerayo wax ku saabsan marka laga hadlayo guurida uu yahay danaha ugu fiican ee il,aha, ay ku jiraan:

- Haddii guuridu ay dhacdo, ma jiraan qaabab lagaga dhigayo qaybo wakhtiyada daryeelka ee waalidka aan guurayn, tusaale ahaan, wakhtiga daryeelka waalidka dheeraadka ah gudaha xagaaga iyo muddada fasaxyada kale ee dugsiga?
- Miyay guuridu sugaysaa ilaa ilmahu uuw aynaado?
- Miyaa waalidka kale sidoo kale u guuray meel cusub?
- Haddii guuridu ay tahay in lagu biiro waalidka lamaanahiisa cusub, miyaan lamaanahu u guuraa meesha hadda ee ilmahu degen yahay taas beddelkeed, markaas jadwalka daryeelka waalidku uma baahna inuu is beddelo?

**Haddii labbada waalid ay aqbabsho meel kala u guurida ilmaha, ma jiraan diidmo ama codsi maxkamadeed oo loo baahan yahay.**

Qofka qorsheeyay meel kale ula guurida ilmaha waxa uu guuri **karaa** ama ka dib taariikhda lagu dhigay ogaysiiska haddi:

1) qofka kale ee masuuliyadaha daryeelka walaidka ee helay ogaysiiska meel kale u guurida ma diido guurida ilmaha gudaha 30 maalmood ee helida ogaysiiska, <u>iyo</u>
2) ma jiraan amarka maxkamada sheegayaga guuridu inaanay dhici karin.

In kastoo *Xeerka Furiinka* aanu u baahnayn, waxay noqon kartaa fikrad wanaagsan in la lahaado jadwalka daryeelka waalidka cusub iyo meesha la degen yahay ee lagu dhigay amarka maxkamada la cusboonaysiiyay. Haddii adiga iyo qof kale oo leh masuuliyadaha daryeelka waalidka aad aqbashaan, heshiisku waxaa la gelin karaa amarka maxkmadda si la xidhiidha oo fudud. Haddii aanad cusboonaysiin amarka maxkamadda, waxay sababi kartaa dhibaatooyinka dugsiga iyo masuuliyiint akale, oo way adkaan lahayd in la xoojiyo qaban qaabada cusub, haddii loo baahdo.

**Haddii aanad aqbalin qorshaha in meel kale loo guurp ilmahaaga, waxaa jira labba qaab oo adiga aad ku diido**

Hadidi aanad aqbalin qorshaha meel kale ula guurida ilmahaaga, oo aanad iman karin heshiiska qofka kale lala gelayo ee masuuliyada daryeelka waalidka, waxaad haysataa **30 maalmood oo aad ku diido ka dib markaad hesho ogaysiiska.**

Waxaa jira labba qaab oo lagu diido:

1. waxaad diidi kartaa inaad waalidka kale siiso faahfaahin gaar ah oo ku saabsan diidmadaada. Foomka **Diidmada Meel kale u Guurida** waxa uu ku tusayaa dhammaan macluumaadka aad kud arayso diidmadaada, ama
2. waxaad codsan kartaa maxkamaddu inay joojiso meel kale u guurida

Marka aad diido, meel kale u guurida inaanay dhici karin ilaa garsoorahu go’aansado inay tahay danaha ugu wanaagsan ee ilmaha.

Foomka **Diidmada Meel kale u Guurida** waxa uu ku waydiinayaa inaad sharxdo:

Labba qodob oo ku saabsan diidmada:

1. Keliya waa suuragal in la diido qorshaha in meel kale la dego **iilmagaaga**; hal waalid ma diidi karo qorshaha waalidka kale inuu guuro.
2. Qof keliya oo leh masuuliyadaha daryeelka waalid ayaa diidi kara. Qof leh amarka xidhiidhku ma diidi karo qorshaha inuu meel kale la dego ilmaha. Waxay si kastaba ha ahaatee, waydiisan karaan amarka

- inaad diido meel kale u guurida
- sababtra aad u diido
- aragtidaada tala soo jeedinta wakhtiga daryeelka waalidka, xidhiidhka iyo masuuliyada go’aan gaadhida.,

Haddii aad hesho **Diidmada Meel kale u Guurida**, codsiga maxkamadda ka soo horjeeda meel kale u guurida ayaa la xareeyaya, **ma kaxayn kartid ilmaha ilaa maxkamaddu ay soo saarto amar oggolaanaya guurida.**

## Sida maxkamaddu ay go’aan uga gaadhayso haddii ilmahu uu karo inuu meel kale u guuro

Maxkamaddu waxay go’aan ka gaadhi doontaa haddii ilmahu uu meel kale u guuri karo ama aanu karin iyaddoo ku salaysan danaha ugu wanaagsan ee ilmaha.

**Danahaa ugu fiican ee asbaabaha ilmaha**

Waxaa jira dhowr asbaabood oo maxkamaddu ay eegayso si ay gp’aan u gaadho danaha ugu fiican ilmaha (eeg qaban qaabada waalidka xaashida xaqiiqda). Waxaa sidoo kale jira dhowr asbaabood maxkamaddu ay eegayso dacwada meel kale u guurida.

Ma jirto sabab keliya oo go’aan ka gaadhi doonta dacwada, oo maxkamaddu waxay eegi doontaa sida mid kastaa ugu habboon tahay xaalada.

Dacwada meel kale u guurida, asbaabaha dheeraadka ah ee maxkamaddu ay eegaysaa waa:

1. **Sababata meel kale u guurida** – maxkamaddu waxay dooni doontaa inay ogaato sababta uu u jiro qorshahan. Tusaale ahaan, waa shaqo cusub in lala joogo lamaane cusub, ama inuu ilmahu soo xaadiro dugsi gaar ah?

2. **Saamaynta meel kale u guurida** ilmaha – tusaale ahaan, waa maxay xidhiidhada qoyska ee ilmaha ee bulshadda hadda iyo bulshadda cusub ee la soo jeediyay?

3. **Wakhtiga daryeelka waalid iyo ku lug lahaanshaha** in waalid kasta uu la lahaado ilmaha – maxkamaddu waxay doonaysaa inay ogaato, tusaale ahaan, haddii ilmahu uu xidhiidh xoogan oo siman la leeyahay labbad awaalidba, ama haddii hal waalidka ah uu ku lug lahaan yar la leeyahay ilmaha.

4. **Haddii qofka qorshaynaya meel kale u guurida ay raaceen sharciyada ogaysiiska** – maxkamaddu waxay dooni doontaa inay ogaato haddii guurida si wanaagsan loo qorsheeyay oo haddii waalidka kale lagu wargeliyay oo la siiyay fursada inuu ka jawaabo tala soo jeedinta. Haddii aanad raacin sharciyadan, maxkamaddu waxay u arki kartaa tan si aan wanaagsanayn.

> *Xusuuso:* Maxkamaddu waxay samayn kartaa ka reebida sharciyada ogaysiiska xaaladaha qaarkood, tusaale ahaan, halka ay ka jirtay rabshada qoyska.

5. **Haddii ay jirto amarka maxkamadda, heshiiska ama abaal marinta dhexdhexaadinta** ee sheega in ilmaha la filayo inuu ku noolaado meel gaar ah. Tusaale ahaan, haddii adiga iyo waalidka kale aad leedihiin heshiiska kala maqnaanshaha ee sheegaya in ilmaha uu sii wadanayo inuu ku noolaado magaalo gaar ah, tani waa sababta maxkamaddu ay u eegi doonto.

> **Abaal marinta dhexdhexaadinta** waa go'aanka uu gaadho dhexdhexaadiyahu (qofka aan ahayn garsootaha, ee xaasku ay qabashay inuu go'aan u gaadhi karo iyaga). Sharciyada gobolku waxay go'aamiyaan cida dhexdhexaadin karta

6. **Haddii tala soo jeedintu ay beddesho qaban qaabada daryeelka waalidku inay macquul tahay**. Maxkamaddu waxay eegi doontaa goobta guriga cusub ee ilmaha ee la soo jeediyay, iyo sida dhabta aiyo kharashka ay ku tagi doonto waalidka aan guurayn inuu u safro goobta cusub ee ilmaha si uu wakhti ula soo wada qaato. Maxkamaddu sidoo kale waxa uu eegi doonaa sida ay ugu fududahay ilmaha inuu dib ugu soo safro meeshii hore ee uu deganaa. Da'da ilmaha iyo shakhsiyada, ay la socoto sharciyada diyaar, tareen iyo bas oo ku saabsan safarka carruurta, dhammaan waa muhiin in laa fejero.

7. **Haddii waalidka waxa uu u hogaansanaa amarada sharciga qoysaskooda, heshiisyada iyo abaal marinta dhexdhexaadinta.** Tusaale ahaam maxkamadda waxay doonaysaa inay ogaato haddii waalidku soo jeedinaya guurida uu diiday wakhtiga daryeelka waalidk wakhtigii hore. Waxay saadaalin karaan dhibaatooyinka mustaqbalka. Maxkamaddu sidoo kale waxay dooni kartaa inay ogaato haddii waalidku aanu doonayn guuridu inay fashilinto xiligii hore si loo isticmaalo wakhtigooda dayeelka waalidk ama inaan la bixin masruufka ilmaha, iyaddoo khatar gelinaysa khatar dhaqaale waalidka kale.

## Kumaa caddaynaya haddii meel kale u guurida ay tahay danaha ugu wanaagsan ee ilmaha

*Xeerka furiinka*, waxa uu leeyahay labba sharci oo kale oo sar eloogu qaadayo degenaanshaha ilmaha oo lagu siinayo kooxaha hagitaanka ku saabsan sida xaaladaha meel kale u guurid ago'aan looga gaadho.

### Wakhtiga daryeelka waalid ee ku filan

Haddii labbada waalid ay haystaa **wakhtiga daryeelka waalid oo si wax ku ool ah u siman** ilmaha (ay ugu dhawaan ahaan haystaan masuuliyada siman ee daryeelida ilmaha), qofka qorshaynaya inuu la guuro ilmaha waa inuu caddeeyo dheelitiranka suuragal ahaanahsha (taas oo macnaheedu yahay aad ayay u dhici kartaa halkii aanays idaas ahaateen) in guuridu ay tahay danka ugu fiican ee ilmaha.

### Daryeel bixiyaha Koowaad ee cad

Haddii qofku uu qorshaynayo inuu meel kale ula guuro ilmaha waxa uu haystaa **wakhtiga ugu badan ee daryeelka waalid** ee ilmaha, waalidka kale waa inuuc addeeyaa dheelitiranka suuragal ahaanshaha (taas oo macnaheedu yahay aad ayay u dhici kartaa in halkii aanay ka ahaan) in guurida aanay ahaan doonin danaha ugu fiican e ilmaha.

Labbadan sharci ee kale keliya waxay ku habboon yihiin halka:

- qaban qaabada daryeelka waalid lagu dejiyay amarka maxkamadda, heshiiska ama abaal marinta dhexdhexaadinta, iyo
- waalidkuna ay u hogaansamayaan iyada.

Tani waa sababtoo ah, xaaladahan, maxkamadda ama walaidka hadda ka hor waxay go'aan ku gaadheen danaha ugu wanaagsan ee ilmaha, oo hadda qof waxa uu soo jeedinayaa in la beddelo qaban qaabada noloshada.

## Kharashyada safarka si loogu dhaqmo wakhtiga daryeelka walaidka

Haddii meel kale u guuridu dhacdo, ilmaha iyo waalidka aan guurayn waxay u baahanayaan inay wada safrtaan, taas oo leh kharashyo, sida diyaarad ama safarka tareenka iyo huteelada.

*Xeerka Furiinku* waxa uu oggolaada maxkamaddu inay samayso amarka ku saabsan haddii iyo sida kharashyadan ay waadidku u wadaagayaan.

Linkiyad ala xidhiidha

- Samaynta Qorshayaasha hagitaanka qaban qaabda daryeelka waalidka ka dib kala maqnaanshaha ama furitaanka
- Liiska magacyada qorshaha daryeelka waalidka
- Helida qorshaha daryeelka waalidka
- Xaashida Xaqiiqda Daryeelka waalidka
- Furitaanka iyo Rabshadda Qoyska
- Xalka khilaafka qoyska: xalinta arrimaha sharciga qoyska ee ka baxsan maxkamadda